

# Gargaarka FEMA Ma Saameyn Doono Faa'iidooyinka Kale

Release Date: Aug 1, 2023

Isu diiwaangelinta gargaarka musiibo ee FEMA laga helo ma saameyn doono u-qalmidaada faa'iidooyinka kale ee dawlada.

Deeqaha FEMA ma ahan dakhli la canshuuri karo, waxaadna aqabali kartaa adigoon yaraneyn ama saareynin faa'iidooyin kale ee federaal ama gobol ee aad hadda u-qalanto. Waxaa tani kamid ahaan kara Amniga Bulsho, faa'iidooyinka Medicare iyo Medicaid, iyo sidookale kuwa aad ka heshid gobolka Vermont, ay ku jirto Barnaamijka Gargaarka Kabka Nafaqo (SNAP) iyo Reach Up, ama Gargaarka Ku-meel-gaarka ah ee Qoysaska Baahan.

Haddii ay ku saameeyeen daadadkii gobolada Caledonia, Chittenden, Lamoille, Orange, Orleans, Rutland, Washington, Windham iyo Windsor, FEMA waxey awoodi karaysaa inay kaa caawiso iney bixiso kharashaadka musiibo-sababtay oo aaney daboolin caymis ama ilo kale. Si aad wax badan uga baratid ama u codsatid, booqo [DisasterAssistance.gov](https://www.DisasterAssistance.gov), lasoo dag [Apka FEMA](https://www.ApkaFEMA) ama ka wac Leenka-Caawinta FEMA **1-800-621-3362**. Adeega fasiraada luuqad ayaa diyaar ah; Haddii aad isticmaashid adeega isku-duwida sida adeeg isku-duwid muuqaal (VRS), adeeg taleefon ee qoraal leh ama waxkale, usii FEMA lambarkaaga adeegaas markaad codsanaysid.

Macaluumaadkii ugu dambeeyey ee jawaab-celinta iyo soo-kabashada Vermont, ka booqo [fema.gov/disaster/4720](https://www.fema.gov/disaster/4720). Kala soco Twitter-ka koontada 1 Gobolka ee FEMA [twitter.com/FEMARegion1](https://twitter.com/FEMARegion1) ama Facebook-ga FEMA [facebook.com/FEMA](https://facebook.com/FEMA). Kala soco Hay'adda Maareynta Arrimaha Degdega ah ee Vermont [twitter.com/vemvt](https://twitter.com/vemvt) ee Twitter iyo Facebook [facebook.com/vermontemergencymanagement](https://facebook.com/vermontemergencymanagement).

FEAM waxaa ka go'an inay xaqiijiso gargaar musiibo ay weheliso sinnaan, takoor la'aan si ku salaaysan midab, kalar, diin, dhalasho, jinsi, da', naafanimo, garashada Ingiriiska, ama xaalad dhaqaale. Ka badbaade kasta ee musiibada ama xubin bulshada ah ayaa lasoo xiriiri karta Xafiiska Xuquuqda Rayidka ee FEMA haddii ay dareemaan iney yihiin dhibane takoor. Xafiiska Xuquuqda



FEMA

Page 1 of 2

Rayidka ee FEMA waxaa lagala soo xiriiri karaa si bilaash ah 833-285-7448. Waxaa diyaar ah hawlwadeeno dhowr luuqadood ku hadla.



**FEMA**